# Iskaashiga Daryeelka Bukaanka

## Fahamka Filashooyinka, Xuquuqaha, iyo Waajibaadka

MaineHealth

# Qodobada

## Waxa aad filan karto inta lagu jiro joogitaankaaga isbitaalka:

- Daryeel isbitaal oo tayo sare leh
- Deegaan nadiif ah oo ammaan ah
- Sidaan u filayno inaan kuula shaqeyno
- Ka qayb qaadashada daryeelkaaga
- Xuquuqdaada ku aadan booqdayaasha
- Hawlgelinta Kooxda Jawaabta Degdegga ah
- Ilaalinta asturnaantaada
- Caawinta marka aad ka baxeyso isbitaalka
- Damaanad qaadaha/macluumaadka qarashaadka bukaanka
- Caawinta qansheegashada qarashaadkaaga
- Jawaabaha su'aalaha, walaacyada, cabashooyinka & tabashooyinka
- Fursad aad noogu sheegto sida aan kuugu shaqeyneyno
- Anshaxa daryeelka
- Xuquuqaha Bukaanka

Dhakhaatiirta caafimaadka, kalkaaliyayaasha caafimaadka iyo kooxda daryeelka caafimaadka ee cisbitaalkayaga waxaa ka go'an inay adiga iyo qoyskaaga kala shaqeeyaan si aad u dabooshaan baahiyahaaga daryeel caafimaad. Kooxdayada heeganka ah waxay u adeegaan bulshada dhamaan qoomiyadeeda, diinteeda, iyo kala duwananshaheeda dhaqaale. Hadafkayagu waa in adiga iyo qoyskaaga aad lahaataan daryeel la mid ah midka aan u rabno qoysaskeena iyo nafteena.

Buug-yarahaan waxaa uu sharxayaa sida aad u filan karto in laguu daweeyo muddada aad isbitaalka ku jirto. Waxaa kale oo uu khuseeyaa sida aad uga qayb qaadan karto daryeelkaaga. Haddii aad su'aalo qabto wakhti kasta, fadlan weydii. Su'aalaha aan la weydiin ama aan laga jawaabin waxay kordhin karaan walbahaarka joogitaanka isbitaalka. Raaxada iyo kalsoonida aad ku qabtid daryeelkaaga aad ayay muhiim noogu tahay.

# Waxa aad filan karta inta lagu jiro joogitaankaaga isbitaalka

## Daryeel isbitaal oo tayo sare leh

Muhiimadayada koowaad waa in aan bixino daryeelka aad u baahan tahay, marka aad u baahan tahay, inagoo adeegsaneyno xirfad, naxariis, iyo ixtiraam. Fadlan u sheeg daryeel-bixiyeyaashaada haddii aad walaac ka qabto daryeelkaaga ama haddii aad xanuun dareemayso. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato aqoonsiga dhakhaatiirta, kalkaaliyayaasha caafimaadka iyo xubnaha kooxda daryeelka caafimaadka ee ku lugta leh daryeelkaaga. Waxaa kaloo aad xaq u leedahay inaad ogaato markay yihiin arday, degane, ama tababarayaal kale.

## Deegaan nadiif ah oo ammaan ah

Isbitaalkeenu wuxuu ku dadaalaa ilaalinta badqabkaaga. Waxaan isticmaalnaa siyaasado iyo habraacyo gaar ah si aan uga fogaano khaladaadka ku jira daryeelkaaga oo aan kaa ilaalinno xadgudub ama dayac. Haddii wax lama filaan ah oo la taaban karo ay dhacaan muddada aad isbitaalka ku jirtid, waxaa laguu sheegi doonaa wixii dhacay, oo wixii isbeddel ah ee ka dhasha dhacdada ee ku yimaada daryeelkaaga ayaa lagaala hadli doonaa.

## Sidaan u filayno inaan kuula shaqeyno

Waa in aan ka shaqaynaa si aan u ilaalino bukaanka iyo booqdayaasha inta ay joogaan. Hadii dabeecadaadu ay tahay mid carqalad leh oo kooxdaada daryeelka caafimaadku ay dareemayaan inaysan ku siin karin daryeel badbaado leh oo waxtar leh, waxaa laga yaabaa in lagaa codsado inaad ka baxdo isbitaalka. Codsigan waxaa loo yaqaana Bixinta Maamulka. Inta aad ku jirto cisbitaalka, waxaanu idinka filaynaa adiga iyo booqdayaashaada inaad:

- Si xushmad leh ula dhaqantaan shaqaalaha oo dhan.
- Si xushmad leh ula dhaqantaan bukaanada kale iyo booqdayaasha.
- Ixtiraamtaan alaabta shakhsiyeed ee dadka kale. Aadan taaban oo aadan dhaqaajin alaabta aadan lahayn.
- Inaad qaadataan mas'uuliyadda cawaaqibka ka dhalan kara raacid la`aanta tilmaamaha ama diidmada daryeelka.
- In aadan sawirin, muuqaal ama cod aadan ka sameyn shaqaalaha fasax la'aan.
- In aad mar walba xirato Aqoonsigaaga.
- Xakamee dabeecadaada haddii aad dareemayso xanaaq. Lama oggola dhaqanka carqaladaynta ah, sida qaylin, wax tuurid, garaacid, hanjabaad, cay ama hanjabaad.
- In aadan keenin hub, dawo, daroogo, khamri, ama waxyaabo qiimo leh sida lacag iyo dahab markaad isbitaalka soo galeyso.

## Ka qayb qaadashada daryeelkaaga

Adiga iyo kooxdaada daryeelka caafimaadka waxaad inta badan go'aamo ka gaartaan daryeelkaaga ka hor inta aanad tagin cisbitaalka. Waqtiyada kale, gaar ahaan xaaladaha degdegga ah, go'aamadaas waxaa la sameeyaa inta lagu jiro joogitaanka isbitaalka. Marka go'aan-qaadashadu dhacayso, waa inay ku jirtaa:

**Ka hadlida xaaladdaada caafimaad iyo macluumaadka ku saabsan doorashooyinka daawaynta ku habboon.** Si aad go'aano xog ogaal ah ula gaarto kooxdaada daryeelka caafimaadka, waxaad u baahan tahay inaad fahanto:

- Faa'iidooyinka iyo khataraha daaweyn kasta.
- Haddii daaweyntaada ay tahay mid tijaabo ah ama qayb ka mid ah daraasad cilmi-baaris.
- Waxa aad si macquul ah uga filan karto daaweyntaada iyo waxyeelo kasta oo muddo dheer ah oo ay ku yeelan karto tayada noloshaada.
- Waxa adiga iyo qoyskaaga u baahan doontaan inaad sameysaan kadib markii aad ka baxdo isbitaalka.
- Cawaaqibka maaliyadeed ee ka imanaya isticmaalka adeegyada aan caymiska lahayn ama aan daboolnayn ama bixiyeyaasha shabakadda ka baxsan.

**Fadlan u sheeg kooxdaada daryeelka caafimaad haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeri ah oo ku saabsan doorashooyinka daaweynta.**

**Ka doodista qorshahaaga daawaynta.** Markaad gasho cisbitaalka, waxaad saxiixaysaa ogolaanshaha guud ee daawaynta. Xaaladaha qaarkood, sida qaliinka ama daaweynta tijaabada ah, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad qoraal ku xaqiijiso inaad fahantay waxa la qorsheeyay oo aad ogolaatay. Habkan waxa loo yaqaan ogolaanshaha xog-ogaalka ah. Oggolaanshaha xog-ogaalka ah wuxuu xaqiijinayaa inaad fahantay khataraha iyo faa'iidooyinka daawooyinka, daawaynta, ama daraasadaha cilmi-baarista ee lagu taliyey. Wuxuu ilaalinayaa xaqa aad u leedahay inaad ogolaato ama diido daawaynta ama ka qaybgalka daraasadaha cilmi-baarista. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sharxi doona cawaaqibka caafimaad ee diidmada daaweynta lagu taliyey. Wuxuu kaloo ilaalinayaa xuquuqdaada ah inaad go'aansato haddii aad rabto inaad ka qaybgasho daraasad cilmi-baaris ah.

**Helitaanka macluumaadka adiga lagaa helayo.** Kooxdaada daryeelka caafimaadku waxay u baahan yihiin macluumaad dhamaystiran oo sax ah oo ku saabsan caafimaadkaaga iyo caymiskaaga si ay go'aano wanaagsan uga gaaraan daryeelkaaga. Taas waxaa ka mid ah:

- Cudurradii hore, qalliinada, ama joogitaannadii isbitaalka.
- Falcelinada xasaasiyadeed ee hore.
- Daawo kasta ama kabka cuntooyinka (sida fitamiinada iyo geedaha) ee aad qaadaneyso.
- Shuruudaha shabakadda ama gelitaanka ee ku jira qorshahaaga caafimaad.

*Sii socota...*

**Fahamka yoolalka iyo qiyamka daryeelka caafimaadkaaga.** Waxaa laga yaabaa inaad leedahay yoolal daryeel caafimaad iyo qiyam ama aaminaad ruuxi ah oo muhiim u ah fayo-qabkaaga. Waxaa ilaa iyo intii suurtogal ah la tixgelin doonaa kuwani inta aad cisbitaalka joogto. Hubi in kooxdaada daryeelka caafimaadka, qoyskaaga, iyo kooxdaada daryeelka ay ogaadaan rabitaankaaga. Waxaad kuwan ku diiwaangelin kartaa dardaaran hore.

**Fahamka cidda ay tahay inay go'aan ka gaarto marka aadan awoodin.** Haddii aad leedahay awooda qareen daryeel caafimaad oo saxiixan ama dardaaran hormaris ah, sii nuqullada kooxdaada daryeelka caafimaadka iyo qoyskaaga. Awoodda qareenka ee daryeelka caafimaadka ayaa sheegaysa cidda kuu hadli karta haddii aadan awoodin inaad adigu go'aanno daryeel caafimaad gaarto. Dardaaran hormaris ah (sidoo kale loo yaqaan dardaaran nololeed) ayaa sheegaya rabitaankaaga ku saabsan dhamaadka daryeelka nolosha. Haddii adiga ama qoyskaaga aad u baahan tihiin in lagaa caawiyo samaynta go'aannada adag, la-taliyayaasha, wadaadada, la-taliyayaasha anshaxa, iyo kuwa kale ayaa diyaar u ah inay ku caawiyaan.

## Xuquuqdaada ku aadan booqdayaasha

Waxaan aqoonsannahay in dhammaan bukaannada ay xaq u leeyihiin inay soo booqdaan kuwa ay jecel yihiin iyo saaxiibada inta ay isbitaalka ku jiraan. Fadlan shaqaalahayaga ka hubso macluumaadka booqdaha ee u gaarka ah waaxda aad ku jirto. Fadlan ogow in booqashooyinku ay noqon karaan kuwo xayiran, xaddidan, ama la diido haddii booqashadu ay farageliso daryeelka caafimaad ee lagama maarmaanka ah ama ay leedahay carqaladayn.

## Hawlgelinta Kooxda Jawaabta Degdegga ah

Xubnaha qoysku inta badan waa kuwa ugu horreeya ee dareema isbeddellada daahsoon ee xaaladda bukaanka. Haddii aad aragto wax adiga ku khuseeya, sida dabeecad aan caadi ahayn ama neefsashada oo kugu adkaata, fadlan ogeysii kalkaalinta. Ogaanshaha Kooxda Jawaabta Degdegga ah waxay kaa caawin kartaa inaad fahamto inuu jiro nidaam aad si dhakhso leh uga jawaabto xaaladahan oo aad siiso daryeelka ugu wanaagsan ee suurtogalka ah qofka aad jeceshahay. Macluumaad ku saabsan sida loo hawlgeliyo kooxda jawaabta degdegga ah ee bukaanka ayuu ku siin doona cusbitaalkaagu.

## Ilaalinta asturnaantaada

Asturnaantaada ayaa muhiim noo ah. Sharciyada gobolka iyo federaalka iyo siyaasadaha isbitaalku waxay ilaalinayaan sirta macluumaadkaaga caafimaad. Waxaad heli doontaa Ogeysiiska Habdhaqanka Asturnaanta oo qeexaya siyaabaha aan u isticmaalno, u wadaagno oo u ilaalino macluumaadkaaga. Waxaa sidoo kale uu sharraxayaa sida loo xareeyo cabashada asturnaanta iyo sida loo helo nuqulka diiwaannadaada caafimaad.

**La wadaagida macluumaadkaaga caafimaadka kuwa kale**

Haddii aad rabto inaan macluumaadkaaga caafimaad la wadaagno dadka kale, waxaad magacaabi kartaa qofka lala xiriirayo, oo sidoo kale loo yaqaan u doodaha.  U doodahaaga ayaa su'aalo ku weydiin kara marka aadan awoodin. Waxay kaa caawin karaan

*Sii socota...*

inaad go'aano qaadato oo aad hesho macluumaad ku saabsan xaaladahaaga daryeelka caafimaadka iyo warbixinada caafimaad. Xaaladaha intooda badan, kaliya ilaaliyaha sharciga ah ama awooda qareenka daryeelka caafimaadka ayaa go'aano kuu gaari kara.

## Diyaarinta adiga iyo qoyskaaga marka aad ka tagayso isbitaalka

Adiga iyo qoyskaaga waxaad door muhiim ah ka ciyaartaan daryeelkaaga. Guusha daaweyntaada badanaa waxay kuxirantahay dadaalkaaga ku aadan inaad raacdo daawada, cuntada, iyo qorshooyinka daawaynta. Kooxdaada daryeelka caafimaadka ayaa ku siin doonta macluumaad oo ku bari doonta sida aad naftaada u daryeesho markaad guriga tagto. Waxaa laga yaabaa inaad caawimaad uga baahato qoyskaaga ama daryeelayaasha kale.

Kooxdaada daryeelka caafimaadka ayaa laga yaabaa inay la shaqeeyaan xirfadlayaasha kale ee bulshadaada si ay u hubiyaan inaad haysato daryeelka aad u baahan tahay markaad ka baxayso isbitaalka. Haddii aad na siiso fasax aan ku wadaagno macluumaadka ku saabsan daryeelkaaga, waxaan kaa caawin karnaa diyaarinta daryeel dabagal ah iyo gudbinada. Waxaad naga filan kartaa inaan ku ogeysiinno haddii cisbitaalkeenu uu dano dhaqaale ka leeyahay wax kasta oo gudbino ah.

## Dammaanad qaadaha/Qarashka bukaanka

Dammaanad qaade waa qofka ama kooxda ka mas'uulka ah bixinta biilka bukaanka. Dammaanad qaaduhu had iyo jeer waa bukaanka ama waalidkood ama masuulka sharciga ah.

- Haddii bukaanku yahay qof weyn oo 18 jir ah ama ka weyn, iyaga ayaa dammaanad qaadaya, haddii aanay ahayn qof weyn oo qof kale ku tiirsan. Hadday sidaas tahay, masuulkooda sharciga ah waa dammaanad qaadaha.
- Haddii bukaanku yahay ilmo da'diisu ka yar tahay 18 jir, dammaanad qaaduhu waa waalidka ama masuulka sharciga ah ee iyaga la jooga wakhtiga booqashada hore. Haddii bukaanku yahay mid xor ah (sharci ahaan madax bannaan) oo aan qaan-gaarin, iyaga ayaa ah Dammaanad qaadaha. Qofku wuxuu Dammaanad qaade u noqon karaa xubno badan oo qoys ah. Tani waxay caawinaysaa dhimista biilasha.

Wixii macluumaad dheeraad ah booqo **mainehealth.org/billing**.

## Caawinta qarashaadka iyo gudbinta qansheegashada caymiska

Waxaan qansheegashada (qarashka) kuugu gudbin doonaa caymisyada caafimaadka oo ay ku jiraan Medicare iyo Medicaid. Haddii aadan haysan caynsanaan caafimaad, waxaanu isku dayi doonaa inaanu idinka caawino adiga iyo qoyskaaga sidii aad u heli lahaydeen gargaar dhaqaale ama aad u samayn lahayd qabanqaabo kale. Waxaan u baahanahay caawimadaada aruurinta macluumaadka loo baahan yahay iyo shuruudaha kale si aan u helno caymis ama caawimo.

Qarashaadka isbitaalka iyo daboolka caymisku inta badan waa jahawareer. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan qarashkaaga la xidhiidh xafiiskayaga ganacsiga.

Haddii ay wax qaldamaan inta lagu jiro daaweynta, waxaad xaq u leedahay sharaxaad daacad ah.

*Sii socota...*

Goobaha daryeelka caafimaad ee aan hayno ma awoodaan in ay adiga, caymiskaaga ama loo shaqeeyahaaga idinku soo dallacaan lacag loogu talagalay adeegyada daryeelka caafimaadka ee loo baahan yahay ee ka dhashay ama lagu saxayo khaladaadka qaar ee la iska ilaalin karo iyo dhacdooyinka xunxun ee ku qeexan sharciga gobolka.

## Jawaabaha su'aalaha, walaaca, cabashooyinka, iyo tabashooyinka

**Haddii aad qabto wax su'aalo ah, walaacyo, ama cabasho ku saabsan daryeelkaaga ama badbaadada, ama aad la kulanto xaalado kor u qaada su'aalo anshaxeed,**fadlan kala hadal maamulaha kalkaalisada, dhakhtarka xaadirka ah, ama xubin kale oo ka tirsan kooxdaada daryeelka caafimaadka. Haddii hababkan aysan horseedin natiijo lagu qanco, ama haddii aad doorbidi lahayd inaadan kala hadlin walaacyadaada shakhsiyaadkan, waxaad raadsan kartaa caawimo dheeraad ah adigoo la xiriiraya goobta aad daryeelka ka heshay adigoo dib u eegaya liiska boggaga 16-19.

**Haddii tabashadaadu ay la xiriirto walaacyada ah in lagugu takooray da'da, qowmiyadda, jinsiyadda, diinta, dhaqanka, luqadda, naafonimada jireed ama dhimireed, heerka dhaqaale, jinsiga, jihada galmada iyo aqoonsiga ama muujinta jinsiga,** waxaa lagugu dhiirrigelinayaa inaad qorto cabashadaada. Fadlan tixraac liiska bogagga 16-19 si aad ula xiriirto goobta aad daryeelka ka heshay.

Cabashadaadu waa inay sheegtaa magacaaga iyo cinwaankaaga waana inay si kooban u sheegtaa falka takoorka ah. Shaqaalahayaga ayaa baaraya cabashadaada, waxayna isku dubaridi doonaan xalinta cabashada, waxayna soo saari doonaan go'aan qoraal ah oo ku saabsan saxnimada cabashada, oo ay ku jiraan waxqabad kasta oo la qaaday, inta badan gudaha 7 maalmood oo maalamaha shaqada ah ka dib marka la helo cabashada.

**Sidoo kale, waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Dowlada Maine, Qeybta Ruqsadaha iyo Shahaadooyinka adigoo wacaya 800-383-2441** ama **207-287-9300 (cod)** ama **Lambarka TDD ee Maine ee 711**. Waxaad kula xiriiri kartaa boostada:

Dept. of Health & Human Services
Division of Licensing & Regulatory Services
41 Anthony Avenue
11 State House Station, Augusta, ME 04333-0011

**IIMAYL AHAAN:** dlrs.complaint@maine.gov

**Haddii aad ku sugan tahay New Hampshire fadlan la xiriir:**

NH Department of Health & Human Services
Health Facility Licensing Unit
129 Pleasant Street, Concord, NH 03301

**TALEEFANKA:** 603-271-9039
**IIMAYLKA:** HFA-LIcensing@dhhs.nh.gov

*Sii socota...*

**Haddii cabashadaada ama tabashadaadu ay quseyso takoor ku saleysan da'da, qowmiyadda, jinsiyadda, diinta, dhaqanka, luqadda, naafonimada jireed ama maskaxeed, heerka dhaqaale, jinsiga, jihada galmada**, iyo aqoonsiga ama muujinta jinsiga, waxaad sidoo kale qori kartaa cabashadaada:

U.S. Department of Health and Human Services
200 Independence Avenue, S.W.
Room 509F HHH Bldg.
Washington, D.C. 20201

Cabashadaada waa in lagu diiwaan geliyaa 180 maalmood gudahood laga bilaabo markii aad ka warsehsay dhacdada la sheegay ee takoorka ah. Waxaad cabashada ku xaraysan kartaa qof ahaan, boostada, telefoon ama iimaylka.

Wac **800-368-1019** ama **800-537-7697 TDD**. Foomamka cabashada waxaa laga heli karaa **hhs.gov/ocr/office/file/index.html**.

Waxaad sidoo kale si elektaroonik ah cabasho ku aadan xuquuqda madaniga ah ugu gudbin kartaa Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka, Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah adigoo booqanaya barta ocrportal.hhs.gov/ocr/portal/lobby.jsf.

## Fursad aad noogu sheegto sida aan kuugu shaqeyneyno

Kadib marka cisbitaalka lagaa saaro, waxaa laga yaabaa inaad ku hesho foomka sahaminta boosto, iimaylka, telefoon ama qoraal. Sahanka bukaanka waa aaladdayada aan ku ogaanno waxa aan si fiican

u qabaneyno iyo halka aan u baahanahay in aan wanaajino. Waa aaladdaada aad inoogu ogeysiineyso sidaan kuu daryeelnay. Jawaabtaadu waa noo muhiim. Haddii aad hesho sahan bukaan, waxaanu kugu dhiirigelinaynaa inaad si daacad ah u dhammaystirto oo aad ku soo celiso baqshadda haddii aad rajaynayso inaad wakhti ku qaadato inaad ka jawaabto.

## Anshaxa daryeelka

Xafiiska Anshaxa Caafimaadku waa agab loogu talagalay bukaannada, xubnaha qoyska, iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka kuwaas oo su'aalo ka qaba arrimaha anshaxa ee daryeelka caafimaadka. Waxaad nagala soo xidhiidhi kartaa su'aalo ku saabsan dhinacyada anshaxa ee daryeelka aad hesho. Waxaan diyaar u nahay inaan kaa caawino inaad kala hadasho dhakhtarkaaga, kalkaalisada, iyo daryeelayaasha kale yoolalka iyo qiyamka daryeelka caafimaadkaaga. Waxaan sidoo kale kaa caawin karnaa inaad diyaariso Dardaaranka Hore. Waxaad codsan kartaa la talinta anshaxa, taasi oo ah adeeg isbitaal oo bilaash ah oo qarsoodi ah. Wada-tashiga, xubnaha kooxda La-talinta Anshaxa waxay la kulmaan bukaannada, xubnaha qoyska, iyo kooxda daryeelka caafimaadka si ay uga caawiyaan ka jawaabista su'aalaha ka dhasha iskahorimaadyada qiimaha ama walaacyada anshaxa. Fikradaha kooxda La-talinta Anshaxa waa talobixin keliya.

Si aad u codsato inaad la hadasho qof ka socda Xafiiska Anshaxa Caafimaadka, waxaad wici kartaa **207-662-3131** ama weydii kooxdaada daryeelka caafimaadka inay nala soo xiriiraan iyagoo ku matalayo.

## Xuquuqaha Bukaanka: Waxaad xaq u leedahay:

- In si xushmad leh laguula dhaqmo
- In lagu ogeysiiyo daryeelka aad heleyso
- Asturnaanta
- In aad macluumaadka ku saabsan daryeelkaaga ku hesho luuqada aad doortay
- In aad go'aan ka gaarto daryeelkaaga, oo ay ku jirto aqbalaadda ama diidmada daryeelka
- In aad hesho daryeel ammaan ah oo aan xadgudub ku jirin
- In xanuunkaaga la maareeyo
- In aad ogaato xaaladdaada caafimaad iyo waxyaalaha ku saabsan daryeelka caafimaad
- In aad waydiiso su'aalo
- In aad hesho diiwaanka caafimaadka, haddii loo baahdo
- In aad hesho daryeel waqti kasta oo maalintii ah, sida ku habboon
- In lagu siiyo macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada
- Inaad hesho daryeel iyo adeegyo. Haddii kooxdayada daryeelka caafimaadka/qofka bixiya daryeelka uu arko in adeegyo ama daawaynno dheeraad ah loogu baahan yahay daryeelkaaga, waxaad xaq u leedahay inaad u wareejiso daryeelkaaga isbitaal kale.

# Macluumaadka xiriirka ee bukaanka doonaya inuu cabasho ama tabasho gudbiyo.

Fadlan la xiriir meesha aad daryeelka ka heshay.

**MaineHealth CHANS Home Health and Hospice**

Quality & Safety Department
60 Baribeau Dr.
Brunswick, ME 04011

**207-729-6782**

**MaineHealth Franklin Hospital**

Quality & Safety Department
111 Franklin Health Commons
Farmington, ME 04938

**207-779-2227**

**MaineHealth Lincoln Hospital**

Quality & Safety Department
35 Miles Street
Damariscotta, ME 04543

**207-633-1923**

*Sii socota...*

**MaineHealth Memorial Hospital**
Quality, Safety, Advocacy & Risk
3073 White Mountain Highway
North Conway, NH 03860

**603-356-0642**

**MaineHealth Behavioral Health**
Quality & Safety Department
123 Andover Road
Westbrook, ME 04092

**207-661-6330**

**MaineHealth Behavioral Health at Spring Harbor**
Quality & Safety Department
123 Andover Road
Westbrook, ME 04092

**207-661-6330**

**MaineHealth Home Health and Hospice**
Quality & Safety Department
15 Industrial Park Rd.
Saco, Maine 04072

**800-660-4867**

## MaineHealth Maine Medical Center Biddeford

Patient Relations Department
1 Medical Center Drive
Biddeford, ME 04005

**207-662-2983**

## MaineHealth Maine Medical Center Sanford

Patient Relations Department
1 Medical Center Drive
Biddeford, ME 04005

**207-662-2983**

## MaineHealth Maine Medical Center Portland

Patient Relations Department
22 Bramhall Street
Portland, ME 04102

**207-662-2983**

## MaineHealth Mid Coast Hospital

Quality & Safety Department
123 Medical Center Drive
Brunswick, ME 04011

**207-373-6377**

*Sii socota...*

## NorDx Laboratory

Compliance Department
301A US Route 1
Scarborough, Maine 04107

**207-396-7830**

## MaineHealth Pen Bay Hospital

Quality & Safety Department
6 Glen Cove Drive
Rockport, ME 04856

**207-301-8491**

## MaineHealth Stephens Hospital

Quality & Safety Department
181 Main Street
Norway, ME 04268

**207-744-6124**

## MaineHealth Waldo Hospital

Quality & Safety Department
6 Glen Cove Drive
Rockport, ME 04856

**207-301-8491**

# Qoraallada iyo su'aalaha

# Qoraallada iyo su'aalaha

Inta aad halkan joogto, waxaad heli doontaa ogeysiisyo faahfaahsan oo ku saabsan qaar ka mid ah xuquuqda aad leedahay maadaama aad tahay bukaanka isbitaalka iyo sida aad u isticmaali karto. Had iyo jeer waxaan xiiseyneynaa in aan wax wanaajino.

Haddii aad qabtid su'aalo, faallooyin, ama walaacyo, fadlan tixraac bogagga 16-19 ee buuggan si aad u hesho macluumaadka xiriirka ee saxda ah.

American Hospital Association

Waxaa dib loo daabacay iyada oo la helay ogolaansho ka yimid Ururka Isbitaallada Maraykanka, xuquuqda daabacaadda 2003, iyo Guddiga Wadajirka ah.

150993-SOMALI 12/25 1098672-24